# Su'aalaha la is Weydiiyo ee Xannaanada Ilmaha la Koriyo

Khayraadkan wuxuu si kooban uga jawaabayaa su'aalaha daryeelka ilmaha ee caadiga ah ee waalidiinta korinta/daryeelayaasha ee ku saabsan daryeelka ilmaha la aqbali karo ee carruurta korinta sida waafaqsan siyaasadda iyo dhaqanka hadda.



## Aan Sharciga Lahayn: Qoyska, Saaxiibka, Daryeelaha Ilmaha iyo Caawinta Kale

### Yaa siin kara daryeelka ilmahayga guriga inta aan maqanahay?

- Qoyska iyo asxaabta ayaa marmar ku caawin kara daryeelka haddii ay ka yar tahay 72 saacadood.
- Baadhitaan taariikh hore in lasoo ogaado ayaa looga baahan yahay asxaabta iyo qoyska bixinta daryeelka ilmaha joogtada ah ee gurigaaga ku sugan.
- Ilaaliyaasha dhaqameed ee caawinaya guriga ilmaha la korinayo loogama baahna inay haystaan sharciga korinta ama daryeelka ilmaha.

### Goorma ayay dadka kale ee waaweyni xanaanayn karaan ilmahayga aan korsanayo?

Saaxiibada iyo qoysku waxay ka caawin karaan gaadiidka iyo kormeerka "hawlaha caruurnimada caadiga ah" (tusaale hurdo la'aan) iyo hawlo la qorsheeyay oo joogto ah (tusaale, hawlo ka baxsan manhajka) oo lagu qeexay *Hagaha Waalidnimada Xikmadda leh* (CWP_0078) ee lagu heli karo qaab onlaayn ah**www.dcyf.wa.gov/publications-library/CWP_0078**

### Miyaan uga tagi karaa ilmahayga caafimaad ahaan jilicsan ee kujira daryeelka koriimaad ee kalkaalisada?

- Daryeelka carruurta jilicsan caafimaad ahaan waa in uu oggolaadaa shaqaalaha kiisku in uu ula socdo kiis-kiis.
- Baadhitaan taariikheed ayaa laga yaabaa in looga baahdo daryeel bixiyayaasha bixiya adeeg daryeel oo gaar ah.

## Daryeelka Ilmaha

Muddo ka yar 24 saacadood maalintiiba waa in la sameeyaa ilaalinta ilmaha jooga meel ka baxsan guriga. Sharciga daryeelka ilmaha ayaa loo baahan yahay marka daryeelka ilmaha loo bixiyo arrimo ganacsi.

### Miyaa daryeel bixiyaha ilmahayga aan korsado ee sharciga lihi u kordhin karaa 10 saacadood maalintii?

- Saacadaha la ogol yahay waa la kordhin karaa iyadoo lagu saleynayo saacadaha shaqada iyo wakhtiga safarka (eeg **https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300-0455** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah).
- Ganacsiyada xanaanada ilmaha ayaa go'aamiya saacadahooda iyo siyaasadahooda. Qaar ka mid ah bixiyeyaasha xanaanada ilmaha ee sharciga leh ayaa laga yaabaa inay ogolaadaan kordhin ama lacag ka badan heerka caadiga ah. Ilmahaaga korinta ayaa laga yaabaa inuu la kulmo daryeelayaal badan guud ahaan maalintii.

### Doorasho noocee ah ayaa loo heli karaa carruurta la korsado ee 13 jir iyo wixii ka weyn oo aan keligood laga tegi karin?

- Kaalmada daryeelka ilmaha waxa la bixin karaa oo keliya marka ilmuhu ku jiro xarun sharci leh oo uu buuxiyo shuruudaha naafanimada jidhka ama maskaxda ee gaarka ah ee uu waajahayo[45 CFR § 98.20(a)(1)].
- Kala hadal shaqaalaha kiiskaaga sidii aad uga faa'iidaysan lahaydeen adiga iyo qoyskaaga iyo asxaabtaada oo aad u heli lahayd barnaamijyada daryeelka dugsiga ka dib.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

## Daryeelka Nasashada

Soo koobid, daryeelka gargaarka ku meel gaadhka ah ee carruurta lagu meeleeyo waalid korinaya oo sharci haysta oo uu bixiyo bixiyaha guriga ama bixiyaha dibadda. Waalidiinta korinta ah looma ogola inay isticmaalaan daryeelka nasiimada isla wakhtiga ay bixiyaan daryeelka nasinta.

### Waalid aan sharci haysan ma ku siin karaa xanaanada ilmaha hal saac oo maalintii ah toddobaadka inta uu bixiyaha nasintaygu ku jiro shaqada?

- Haa, nidaamkan waa mid la aqbali karo, haddii nasintaadu ay tahay mid aan joogto ahayn oo waalidkan aanu u bixinayn daryeelkan si uu ganacsi uga shaqeeyo.
- Shaqaaluhu waa inuu bixiyaa oggolaanshaha habayntan.

### Labada waalid ee korsada ma siin karaan nasasho toddobaadle ah oo uu siiyo midba midka kale?

- Haa, tan waxaa loo tixgeliyaa "isbadalka iska nasinta." Tan waa la ogol yahay haddii waalid kasta oo korinaya ilmuhu uu u hoggaansamo shuruudaha awoodda sharciga.
- Shaqaaluhu waa inuu oggolaadaa isbadalk iska nasinta.

### Ma ku xannaanayn karaa qof kale oo ilmo korsanayaa gurigayga xitaa haddii ay taasi ay awoodayda ka baxsan tahay?

- Maya, waa inaad u hogaansantaa shuruudaha sharciga oo aad ogolaasho ka hesho shaqaalaha kiiska.
- Xaaladaha ka baxsan awoodaadu waxay u baahan yihiin ansixinta sharci bixiyahaaga.

## Lacag Bixinta

VDib u eegista jaantuska Heerarka Taageerada Daryeel Bixiyaha(**https://dcyf.wa.gov/services/foster-parenting/caregiver-supports-project**) iyo SU'AALAHA INTA BADAN LAYS WAYDIIYO ee Bixiyaha Lacagta (**https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/ProviderPaymentsFAQ.pdf**) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lacag bixinta.

### Ma bixin karaa daryeel nasasho oo ilmo kale ah kaasoo lacag aan ka helayo ilaa meesha daryeelka ilmaha ee sharciga leh laga furayo?

- Haa, iyadoo leh shuruudo gaar ah, waalidiinta korinta ayaa bixin kara "nasinta sii-haynta" (ku-meel-gaadh ah, muddo gaaban ilaa 14 maalmood).
- Waa in aad sharci u haysataa da'da ilmaha la korinayo. Waa inaanad ka kordhin awooda sharcigu ku siiyay. Waalidka korinaya waa inuu haystaa maalmaha nasinta ee la kordhiyey.
- Waa inaad heshaa sharciga daryeelka ilmaha haddii habayntu noqoto mid joogto ah oo wakhti dheeri ah tahay.

### Miyaa shaqaale ilmo korinaya oo sharci haysta ama daryeel bixiye nasasho oo la xaqiijiyay kaasoo ku nool gurigaygu heli karaa lacag bixinta gobolka ee daryeelka ilmo haynta guriga dhexdiisa taas oo uu helo ilmahaygu

- Maya, nasinta bilaa sharciga ah ma bixin karo gobolku marka daryeel bixiyuhu uu yahay xubin qoyska ka tirsan.
- Shaqaale daryeel ilmo oo bixiya daryeelka nasinta wuxuu u baahan yahay labadaba hubinta taariikhda sharciyeed ee daryeelka ilmaha iyo hubinta taariikhda daryeelka korinta labadaba.

### Qofka ilmaha ii korinaysa gobolku lacag ma siinayaa?

- Ilmo xanaaniyaha ama ilmo hayaha waa in uu yahay daryeel bixiye sharci leh si uu ugu qalmo lacag bixinta gobolka.

**AMA SU'AALO DHEERAAD AH OO KU SAABSAN DARYEELKA ILMAHA, LA XIDHIIDH:**

**dcyf.welcome@dcyf.wa.gov**

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka **communications@dcyf.wa.gov**.*

DCYF PUBLICATION LIC_0149 SM (01-2024) Somali